# Maamul wanaaga
# 10 qodob oo sarre oo xubnaha Guddiga

01 Ogsoonow hadafka samafal ee ururkaaga wuxuu yahay xaqiijina in adiga iyo ururkaagu ay arrintaa ka shaqaynayaan – haddii aadan hubin, weydii naftaada haddii ficilkaagu kor u qaadayo ururkaaga hadafkiisa samafal.

02 Cadday doorkaaga xaqiijina in doorka iyo masuuliyaadka qof walba oo ururkaaga in aad loo fahmay, kuwaasi ama ha ahaadeen tabaruciin, xubnaha, guddiga sarre, ama macaamiil amaba shaqaale.

03 Faham booska dhaqaale ee ururkaaga lana soco caddaynta dhaqaalaha – qof kasta oo ka tirsan waa in uu wax ku leeyahay masuuliyada si loo xaqiijiyo in ururkaaga dhaqaalihiisa si fiican loo maamulay.

04 Maskaxda ku hay masuuliyaadka iyo waajibaadka xubin guddiga ka tirsan ahaan marka la samaynayo go'aanada xubin guddiga sarre ka tirsan ahaan, khaasatan kuwa ad-adag.

05 Qaado koobiga shuruucdaada: akhri, faham, raac haddii aadan hubina, weydii xubnaha kale oo guddiga ama raadso talo mihnadeed.

06 In kastoo xubnaha guddiga sarre u shaqay-yaan koox ahaan, ha iska raacin gurdanka. Had iyo jeer samay waxaad u aragto inay tahay waxa ugu fiican ururkaaga, xataa haddii taas macneheedu tahay qaadashada aragti ka duwan xubnaha guddiga ee kale.

07 Faham ururkaaga waajibaadkiisa hay'adaha dawlada (sida ACNC iyo xeer sameeyayaasha kale) xaqiijina in ururkaagu buuxinayo.

08 Dhegayso xubnaha kale ee guddiga lana shaqay kooxda. Guddigaagu waxay wadaagaan masuuliyad wadajir ah oo ururka waana inaad u aragtaa xubnaha guddiga jaal ama saaxiib shaqo.

09 Ku kalsoonow inaad xusto oo aad maarayso khilaafka daneed si masuul ah. Xubnaha guddiga badankood waxay diidan yihiin khilaafka daneed waana inaad ku kalsoonaataa in aad si masuulnimo ah wax uga qabato.

10 Had iyo jeer u shaqay sida ugu fiican ururkaaga – xubin guddi ahaan waxaa ku saaran masuuliyada inaad ka hormarsio danta guud dantaada gaarka ah.

**Meesha lagala xiriirayo ACNC**
Tel: 13 ACNC (13 22 62)
Email: advice@acnc.gov.au
Mail: Advice Services, Australian Charities and Not-for-profits Commission, GPO Box 5108, Melbourne VIC 3001
Fax: 1300 232 569

Si aad noogula xiriirto af aan ka ahayn Ingiriis, waxaad isticmaali kartaa Adeega Tarjumida Qoraalka iyo Afcelinta (TIS) si aad noola soo xiriirto. Si aad u isticmaasho adeegaan, wac TIS telefoonka 131 450 weydiina mutarjumku inuu waco 13 22 62.

© Xuquuqda qoraalka 2015
Waxaad xaq u leedahay inaad koobi ka samayso, sideeda ku qaadato, wax ka bedesho, gudbiso oo aad qaybiso qoraalladaan sidaad u rabto (laakiin maaha si muujinaysa in ACNC ama Dawlada Dhexe ansixisay ama mid kasta oo ka mid ah adeegaaga ama badeecadaada).

Qoraalku waa kii ugu dambeeyey ee Juun 2015.